

Car Seats Made Simple



Muxuu leeyahay Sharciga Minnesota?

Sharciga Minnesota ee Xakamaynta Caruurta Rakaabka ah

Qodobka Minnesota 169.685, Xeer-hoosaadka 5 (Minnesota Statute 169.685, Subd. 5)

- **Sharciga Minnesota Law:** Canugga 8 jirka ka yar haddna ka gaaban 4 cagood iyo 9 inj waxaa laga raba in lagu xiro kursiga ammaanka ee u qalma heerarka ammaanka federaalka. Wixii sharcigan hoosyimaada, canugga kaligii kuma uu fariisan karo isaga oo suunka gaariga kaliya isticmaalaya illaa uu ka gaaro 8 sano ama 4 cagood iyo 9 inji dherar ah — hadba kii soo hormara. Haddii lagu soo taliyay in ilmaha lagu hayo kursiga kor loo qaadayo taaso ku xiran culayskooda, halkii da'aaddoodal loo eegi lahaa (egg buugga tasmada ama calamaadaha ku qoran kursiga ammaanka ilmaha si aad ku habsato haddii uu yahay kii ku habboonaa ilmahaaga culayskiisa iyo jooggiisa.)
- Cunugga waa in lagu hubiyo (suumanka lagu xiro) kursiga ammaanka.
- Kursiga waa in lagu habsado gaariga.
- Ilmhaha (culeyskoodu uu ka hooseeyo 20 rodol kana yar hal sano) waa in lagu fadhiisiyo kursiga aamaanka ee gadaal u jeeda.
- Sharciga wuxuu saameynayaa dhammaan gawaarida markii horeba lagu dhisay iyaga oo leh sumaanka kurasida.
- Sharciga wuxuu saameeyaan kuraasida lagu fariistoo idil — qof kasta, kursi kasta, wakhti kasta.
- Darewarka ayaa musuuliyadda leh.
- Ganaaxa dembiga yar ee jabinta sharciga waa \$50 (taaso lagaa cafinayo haddii la imaatid caddayn aad ku samaysid kursiga ammaanka muddo 14 cisho ah).
- Wuxuu saameynayaa dadka deeggan iyo kuwa aan degganayn Minnesota.
- Tuhunka isticmaal la'aanta waxay sababi kartaa in gariga la joojiyo.

Waxaa sharciga ka reeban

- Caruurta lagu wado gawaarida birmadka caafimaadka ah, marka xaaladda caafimaadka ay isticmaalka kursiga aamaanka ay noqo waxaan caqligal ahayn.
- Caruurta saaran gawaarida la ijaarto ay kamid yihiin tagaasida, limosiinka ayroboorka ama baska, laakin ay reeban yihiin gawaarida la kiraysto iyo kuwa la soo daysado.
- Caruurta saaran gawarida boliiska oo hawl ku jira, oo aan kursiga gaariga lahayn (waxaa lagu badali karaa suunka gaariga).
- Caruurta uu dhakhtar ku sheegay inay qabaan xaalado caafimaad, caafimaadka dhimirta oo xakamaynta ka dhigaysa wax aan habbonayn.
- Rakaabka saaran basaska dugsiga.

Waxaa Laga soo xigtay: Waaxda Ammaanka Guud ee Minnesota, Xafiiska Ammaanka Gaadiidka (Minnesota Department of Public Safety, Office of Traffic Safety)

Caadada ugu Fiican

- Marka canug uu 4 sano gaaro, haddii ay weli buuxin karaan kursigooda caruurta ee gaariga, sii isticmaal illaa uu canuggaaga gaaro kursiga xadkiisa sare ee joogga iyo culayska.
- Haddii canuggaaga uu siddeed sano gaaro laakiin uu ka gaabanyahay 4 cagood iyo 9 inji (4'9"), sii isticmaal kursiga kor loo qaadayo.
- Caruurta ka yar 13 sanadood waa inay fariistaan kuraasta dambe ee gaariga.
- Waxkasta oo aan dabool lahayn gali halka dambe ee gaariga. Hadduu shil dhaco waxyaabaha bannaanada yaalla waxay keeni karaan halisyo dhawacyo.